

Sicirka CUSUB ee mushahaarka ugu yar ee Degmada King County ee aan la wadaagin

\$20.29 saacadii

Dhaqangalaya Janaayo 1, 2025

Waxaa jira saddex ka dhaafitaano, oo ku salaysan cabbirka ganacsiga iyo dakhliga guud.

Haddii loo shaqeeyaha uu leeyahay...	Mushaharka ugu yar waa...	Loo-shaqeeyayaasha, calaamadeey midka khuseeya
15 ama ka yar shaqaale iyo dakhli ka yar \$2 milyan	\$17.29 saacadii	
15 ama ka yar shaqaale iyo dakhli gaaraya \$2 milyan ama ka badan	\$18.29 saacadii	
In ka badan 15 laakiin in ka yar 500 oo shaqaale ah	\$18.29 saacadii	
In ka badan 500 oo shaqaale ah iyo dakhliga guud oo gaaraya caddad kasta	\$20.29 saacadii	

- Qof kasta oo ka shaqeeya Degmada King County ee aan la wadaagin waa in la siiyaa ugu yaraan sicirkan.
- Degmada King County ee aan la wadaagin macneheedu waa aagagga ka baxsan xadka magaalada ee hoos yimaada xukunka Degmada King County.
- Lacagta gacan dhiibka ah, lacagta mahadcelinta ah, khidmadaha adeegga, gunnooyinka guryeynta iyo caafimaadka laguma xisaabinayo mushaharka ugu yar.
- Mushaharka ugu yar ayaa kordhin doona sanad walba si loo waafajiyo sicir-bararka.
- Loo-shaqeeyayaashu waa inay u hoggaansamaan sharciyadan. Aargoosigu waa sharci darro.
- Loo-shaqeeyayaashu waa inay mushahaarka ugu yar ku soo dhejiyaan meel ay shaqaaluhu arki karaan.



kingcounty.gov/wag



AskLocalServices@kingcounty.gov



206-477-3800



limayl soo dir ama na soo wac si aad u codsato macluumaadkan oo luqad kale ama qaab kale ah.